# XEERKA DOORASHOOYINKA MADAXTOOYADA IYO GOLYAASHA DEEGAANKA – XEER LR – 20/2001 IYO WAX KA BEDDELKIISII 2009 IYO 2010 IYO 2011
# (THE PRESIDENTIAL AND LOCAL COUNCILS ELECTION LAW (LAW No 20/2001) AS AMENDED IN 2009, 2010 and 2011)

## Hor u dhaca nuqulkan Xeerka iyo wax ka bedelkiisii oo isku dhafan (Consolidated text)

Sanadkan 2012 waxa la qabanayaa doorashadii golayaasha deegaanka oo ay ka qaybgelayaan sadexda xisbi qaran ee hadda jira iyo ururada siyaasada ee la diiwaangeliyey. Doorashadani waxay kaloo kala saareysa xisbiyadda iyo ururada tartamaya si ay u soo baxaan sadexda "xisbi qaran" ee cusub.

Xeerkan Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka (iyo Madaxweynaha) oo so baxay 2001kii waxaa bedelaad lagu sameeyey 2009kii (Lifaaqii 1aad) si loogu daro qodobo suurtagelinaya doorasho ku saleysan diiwaan codbixiyaal oo Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaasha (Xeer Lr. 27/2007) habkeeda dhigey.

Xeerkan waxaa kale oo wax laga bedellay 2010kii (Lifaaqii 2aad) iyo 2011kii (Lifaaqii 3aad) in kasta oo labadan lifaaq aanay saameyn ku laheyn diiwaangelinta codbixiyaasha.

Haddanna waxaa dhowaan dhaqangelay 13kii Diisambar 2011 Wax ka bedelkii (3aad) ee **Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaasha 2007** oo ka kooban shantan qodob oo keliya:

"1. Diwaangelintii hore ee 2008-kii laga qabtay Dalka JSL waa la laalay.
2. Doorashooyinka soo socda ee Golayaasha Deegaanka oo kaliya ayaa lagu galayaa diiwaangelin la'aan.
3. Ka hor Doorashoyinka Golaha Wakiilada iyo Madaxtooyada waa in Dalka JSL, lagu qabtaa Diiwaangelin Cusub oo Doorashooyinka Golaha Wakiilada iyo Madaxtooyada lagu gala.
4. Waxa la laalay Qodob[*ada*] Ku cad Xeerka Doorashooyinka Xeer Lr. 20/2001, wax ka bedelka (Kuna suntan Qodob Cusub). [*Waa uun kuwa ku saabsan diiwaangelinta oo wax ka bedelkani ay ku ekaayeen].*
5. Waxa halkan lagu laalay qodob kasta oo ka hor imanaya faqradahan lifaaqan ee (1, 2 ,3 , 4)."

Wax ka bedelkani isagoo laalay diiwaangelintii hore, waxaa kale oo uu ansixiyey in doorashada golayaasha deegaanka ee 2012 <u>oo keliya</u> lagu galayo diiwaan la'aan. Wuxuu kaloo farayaa in la laalay wax ka bedelkii lagu sameeyey Xeerkan Doorashooyinka (20/2001) ee ku saabsanaa diiwaangelinta, taas oo ku jirtey wax ka bedelkii 2009kii (Lifaaqa 2) ee Xeerkan Dooraashooyinka. In kasta oo ay fiicnaan la heyd in wax ka bedelkan ku saabsan diiwaangelinta uu si cad u dhigo in qodabaddii Xeerkan Doorashooyinka ee laga saray 2009kii dib loogu soo celiyey si loo isticmaalo doorashada deegaanka ee 2012 oo keliya, waxa wax ka bedelka 2009kii ku jirey Qodobkan 66(1) oo sidan u dhigan:

> "*Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Lr. 20/2001 waxa loo adeegsan karaa oo keliya doorasho kasta oo ku salaysan nidaamka doorasho ee cod-bixiyayaashu diiwaan-gashan yihiin ee laga qabto dalka JSL".*

Waxa loogu daray faqradan iyadoo waqtigaas diiwaangelinta codbixiyaasha aan la hubin in ay hirgelidoontu iyo in kala. In kastoo walaac ka jirey diiwaankii la soo saarey hadana waa lagu galey doorashadii Madaxweynaha ee dhacday 26kii Juun 2010.

Qodobkaas 66(1)aad waxa uu ila yahay in mar haddii doorashada golayaasha deegaanka ee 2012 aan lagu galeyn diiwangelin in la raaci karo oo markaas wax ka bedelkii lagu sameeyey 2009kii Xeerkan Doorashooyinka aanu saameyn ku lahayn doorashadan 2012ka oo ay furantahay in dib loogu noqonayo qodabadii 2001kii ee suurtageliyey doorashadii 2002gii ee lagu galey bliaa diiwaan-codbixiyaal. Waxaa kale oo u furan **Gudiga Doorashooyinka Qaranka** in uu u jeediyo xukuumada wixii kale ay wax ka bedel ah ee loo baahanyahay intii ee ah hagaajin nidaamka hab maamulka codbixinta (voting procedural improvements) ee ku saleysan casharadii laga bartay doorashhoyinkii hore iyo waayo aragtidaa, iyo wax ku darka hab dhaqanka (codes of conduct) ururada iyo xisbiyada ka qayb gelaya doorashada.

Waxaan markaas halkan kusoo ururiyey Xeerkii Doorashooyinka (Lr 20/2001) iyo wax ka bedelladiisii oo dhan (consolidated copy) oo ay ku jiraan:

1) dhamaan wax ka bedelkii 2009ka (lifaaqii 1aad) ee ku saabsanaa hirgelinta diwaanka codbixiyaasha oo aan xariijin mariyey si loo arko in aanay doorashadan 2012 ee golayaasha deegaanka aanay saameyn ku laheyn;
2) qodobadii laga saarey Xeerka 2009kii oo aan dib u soo geliyey iyagoo si gaar ah u muuqda si loogu dhaqmo doorashada 2012 ee golayaasha deegaanka oo kaliya;
3) wax ka bedelladii kale (sida Lifaaqii 2aad); iyo
4) wax ka bedelka Xeerkan lagu sameeyey Lifaaqa 3aad ee 2011 oo ku saabsan labadan qodob:

   b) Qod. 33(4) oo da'da hoose ee murashixiinata golyaasha deeganka laga dhigey 25 jir halka uu markii hore ahaa 35 jir, iyo

   t) Qod. 22 oo laga bedellay habka doorashada golayaasha deegaanka nidaamka liiska xidhan oo loo bedellay liiska furan.

Haddii wax ka bedel kale lagu sameeyo Xeerkan ka hor doorasha soo socota, waxaan ku kordhin doona nuqulkan oo laga helikaro mareegta www.somalilandlaw.com.

**Ibrahim Hashi Jama, Tifatiraha**
**(editor@somalilandlaw.com )**
**January 2012**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# XEERKA DOORASHOOYINKA MADAXTOOYADA IYO GOLYAASHA DEEGAANKA – XEER LR – 20/2001 IYO WAX KA BEDDELKIISII 2009, 2010 IYO 2011 (ILAA JAN. 2012) OO ISKU DHAFAN (CONSOLIDATED TEXT)

**Golaha Wakiilada**

Markuu Arkay: Qodobada 9aad, 22aad , 25aad, 83aad iyo 111aad ee Dastuurka Qaranka JSL.

Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo ka digo-rogashada hab- beeleedka iyo xaqiijinta himilada ummaddu ka dhursugaysay mudada dheer ee u tartanka xorta ah ee xilalka Qaranka.

**WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN:**

## Qodobka 1aad
## Macnaha erey-bixinta

**Doorasho:** waxa loola jeedaa kala saaridda murashaxiinta u tartamaya xilalka, iyadoo lagu go'aan qaadanayo aqlabiyadda codadka dadka ay khusayso.
**Komishanka:** waxaa loola jeedaa Guddiga sare ee loo xilsaaray maamulidda iyo ka garsooridda doorashooyinka.
**Goob-codbixin**: waxa loola jeedaa goobaha tirooyin dadweynaha ka mid ah oo isku degaan dhaw ka dhiibanayaan codkooda .
**Goob-Doorasho:** waxa loola jeedaa barta kulmisa goobo-codbixineed oo loogu talagalay in lagu kala saaro laba murashax iyo wixii ka badan
**Wakiil:** waxa loola jeedaa xubinta urur/xisbi u soo wakiishay la socodka hawlaha doorashada ee goob-cod-bixineed ama xafiisyada doorashada.
**Murashax:** waxa loola jeedaa xubinta uu ururkiisu/xisbigiisu u soo magacaabay inuu u tartamo xil lagu heli karo doorasho.
**Cod-bixiye:** waxa loola jeedaa qofka buuxiyey shuruudaha cod-bixinta ee go'aankiisa ku dhiibanaya cod.
**Golaha Degaanka:** waxa loola jeedaa Golaha cod-bixiyayaasha degmadu u doortaan maamulka iyo sharci-dejinta D/Hoose ee degmada
**Gobol-doorasho:** waxa loola jeedaa soohdimaha kulmiya degmooyin doorasho.
**Degmo-doorasho:** waxa loola jeedaa soohdimaha kulmiya ugu yaraan hal goob-doorasho.
**Kursi:** waxa loola jeedaa jago-xil oo lagu hananayo doorasho hal qof.
**Astaan/Astaamaha:** waxa loola jeedaa summadda ama calaamadda u gaarka ah hal xisbi/urur [*ama murashax doorashada deegaanka*}[1] ee lagu aqoonsanayo.

[1] Waxay taasi ka muuqataa Lifaaqii 3aad oo Qodobka 22(1)aad oo habka liiska doorashada bedellay

**Liis/Liisaska:** waxa loola magacyada murashaxiinta uu soo gudbiyey xisbi/urur [~~loona kala hormariyey siday u kala helayaan doorashada~~][2].
**Ololaha Doorashada:** waxa loola jeedaa hawlgalka ay ururada/axsaabtu iyo murashaxiintoodu ugu tartamayaan iska dhaadhicinta iyo soo kala jiidashada cod-bixiyayaasha.
**Xafiiska dhexe:** waxa loola jeedaa xarunta ugu saraysa ee laga maamulayo hawsha doorashada ee ay ku shaqeeyaan Komishanka.
**Xafiiska Degmada:** waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo goobaha cod-bixinta ee degmo.
**Xafiiska Gobolka:** waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee Gobolka.
**Xafiiska Goobta:** waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee goob-cod-bixineed.
**Goob-joogayaal:** Waxa loola jeedaa kormeerayaasha caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha doorashooyinka ee Komishanku aqoonsadey.

## Qodobka 2aad
## Mabaadiida guud

Xeerkan waxaa lagu maamulayaa doorashooyinka Golayaasha Degaanada iyo tan Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha JSL.

## Qodobka 3aad
## Mudada xilka

Mudada xilka ee Murashaxiinta la doorto waxay ahaanaysaa:
1. Madaxweynaha & Ku xigeenkiisa 5 sano
2. Golayaasha Degaanada 5 sano

## Qodobka 4aad
## Tirada Golayaasha Degaanada

Tirada Golayaasha Degaanada ee la soo dooranayaa waxay ahaanaysaa:-

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. | Golaha Degaanka Caasimada | | 25 Mudane |
| t. | G/Degaanka degmooyinka darajada | A | 21 Mudane |
| j. | " " " | B | 17 Mudane |
| x. | " " " | C | 13 Mudane |
| Kh. | " " " | D | 09 Mudane |

## Qodobka 5aad
## Shuruudaha cod-bixiyaha

b. Waa inuu yahay Muwaadin Somaliland u dhashay.
t. Waa in aan da'diisu ka yaraan 16 sano, sanadka doorashada la qabanayo.

[2] Waxaa weedhan bedellay Lifaaqii 3aad oo Qodaobka 22(1) oo habka liiska doorashada bedellay.

j. Waa inuu xor yahay oo aanu xabsi ku jirin.

*x.* ~~*Waa inuu yahay cod-bixiye ka diiwaan-gashan goobta uu ka codaynayo, haddii aanu ka mid ahayn hawlwadeennada xafiiska goobta codbixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta ama ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka goobta codbixinta.*~~

Kh. Murashaxiinta u tartamaaya jagooyinka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisu waxa ay ka codayn karaan goob kasta oo cod-bixineed. Haseyeeshee hawl-wadeennada Doorashadu waa in ay arrintaas diiwaan-geliyaan.[3]

## Qodobka 6aad
## Xuquuqda Cod-bixiyaha

Cod-bixiye kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamay wuxuu xaq u leeyahay:-

~~1. *Inuu codkiisa ka dhiibto goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaan-gashan yahay.*~~

2. Cod-bixiyaha ka maqan dalka JSL wuxuu ka coddaynayaa xafiisyada diblomaasiyadeed ee JSL ku leedahay dibedda ee ugu dhow, haddii aanay jirin ama aanay suuragal ahayn waxa tallo ka gaadhaya Komishanka.
3. Codku waa inuu ahaado mid shakhsi ah, xor ah, toos ah, qarsoodi ah oo si siman loo tixgeliyo.
4. Cod-bixiye kastaa wuxuu yeelanayaa hal cod oo keliya doorashadiiba.
5. Xubnaha Komishanka doorashooyinku ma laha xaqa cod-bixinta inta ay xilka hayaan.

~~6. *Hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka boliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu waxay ka codayn karaan goobta codbixineed ee ay ka hawlgelayaan maalinta cod-bixinta.*~~[4]

## Qodobka 7aad
## Shaqaalaha Dawladda & Hay'adaha Dawliga ah

1. Shaqaalaha Dawladda, kuwa Hay'adaha madaxa banaan ee Dawladda iyo ciidamada Qaranka darajo kasta ha lahaadeene looma ogola inay isu sharaxaan doorashooyinka Degaanada iyo Madaxwaynaha ama Ku-xigeenka Madaxweynaha, haddii aanay shaqo-ka-tegis soo qoran 180 cisho ka hor taariikhda qabashada doorashada. [~~Xilligani doorasho ee hadda (doorashadan hore) mudada shaqo ka tegistu waxay ahaanaysaa lixdan (60) maalmood ka hor taariikhda qabashada doorashada~~[5]].

[3] In kastoo faqradani oo ku jirtay wax ka beddelkii 2010kii ay la xidhiidhay nidaamaka diiwaanka codbiiyaasha, wax saameyn ah kuma laha Doorashada Golayaasha Deegaanka ee 2012 oo waxay ku saabsantahy doorashada Madaxweynha.

[4] Faqradan looma baahna Doorashada 2012ka ee Golayaasha Deegaanka ee lagu galayo bilaa diiwaan-codbixiye, waayo hawleadennada iyo dadka kale ee ku xusan faqradan wax iska hortaaga ma jiro in ay codkooda ka dhiibtaan goobta dooraho ay joogaan. Faqradan sababta Xeerka loogu darey waxay aheyd Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaasha oo dhigey in qof kasta uu codkiisa ka dhiiban karo oo kaliya goobta doorasho ee laga diiwanngeliyey.

[5] Weedhani waxay ku saabsaneyd doorashii Madaxeynaha ee dhacay 26 June 2010 oo kaliya.

2. Shaqo-ka-tegidda waxa shardi u ah inay sidaa qoraal ku soo caddeyso xafiiska ama Hay'adda awooda u leh caddayntaas

**Qodobka 8aad**
**Wakhtiga qabashada doorashooyinka**

Komishanka ayaa cayimaya taariikhaha la qabanayo doorashooyinka si waafaqsan Dastuurka, waxanay ku soo bixi doontaa Degreeto Madaxweyne

**Qodobka 9aad**
**Goobaha Cod-bixinta**

1. Marka la qabanayo doorashada Madaxweynaha & ku xigeenka waxa dalka loo qaybinayaa gobolo-doorasho (electoral regions) oo loo sii qaybinayo goobo-codbixin (polling stations) iyadoo la waafajinayo soohdimaha Gobolada dalka JSL
2. Doorashada Golayaasha Degaanada marka la qabanayo soohdimaha maamulka degmada ayaa loo aqoonsanayaa Degmo-doorasho (electoral district), waxaana loo sii qaybinayaa goobo-codbixin, halkaas oo ay ka dhici doonto doorashada Degaanku.
3. Komishanku waa inuu sameeyo goobaha codbixinta ee degmooyinka/gobolada ugu yaraan 40 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta la qabanayo, waxanu Komishanku arrintaas kala tashanayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Gudoomiyayaasha Gobolada iyo Degmooyinka.

**KOMISHANKA DOORASHOOYINKA JSL**

**Qodobka 10aad**
**Qaab-dhismeedka Komishanka Doorashooyinka**

Qaab-dhismeedka xafiisyada Komishanka Doorashooyinku wuxuu ahaanayaa sidan:-
1. Xafiiska goobta cod-bixinta doorashada
2. Xafiiska Degmada ee doorashada
3. Xafiiska Gobolka ee doorashada
4. Xafiiska dhexe ee doorashooyinka

**Qodobka 11aad**
**Komishanka doorashooyinka**

1. Komishanku wuxuu ka koobnanayaa 7 xubnood, oo kala ah:
   b. Gudoomiye iyo 6 xubnood
   t. Gudoomiyaha & Gudoomiye-xigeenka Komishanka ayaa iska dhexdooranaya.
   j. Mudada xilka ee Komishanku waa 5 sano, oo ka bilaabmaysa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, waana loo cusboonaysiin karaa xilka.
   x. Shaqaale dawladeed, xubin Barlaman, Xubnaha Golaha Wasiirada, ciidan Qaran iyo xubin xil u haysa urur/xisbi kama mid noqon karo Komishanka.

2. Komishanka doorashooyinka waxa magcaabaya Madaxweynaha JSL ka dib marka uu helo soo jeedimaha :-
   b. 2 xubnood oo Golaha Guurtidu soo xulo.
   t. 2 xubnood oo ay soo xulayaan ururada/xisbiyada mucaaridka ah ee diiwaan-gashan.
   j. 3 xubnood ee kale Madaxweynaha ayaa soo xulaya.
3. Komishanka waxa cod kala badh iyo hal ah (absolute majority) ku ansixinaya Golaha Wakiilada, markuu guddi- hoosaadka Arrimaha Guduhu soo hubiyo in ay buuxinayaan shuruudaha Xeerku tilmaamayo.
4. Xafiiska dhexe ee Komishanka doorashooyinku wuxuu xaruntiisa ku yeelanayaa caasimadda Hargeysa.
5. Komishanka xil-gudashadiisa wuxuu ku salaynayaa Dastuurka iyo Xeerkan, shirarkoodu wuxuu ku qabsoomayaa Kooram, go'aanadoodu waxay ku ansaxayaan aqlabiyad.
6. Komishanku wuxuu xilkiisa u gudanayaa si madax banaan, lagumana samayn karo wax fara gelin ah haba yaraatee.

## Qodobka 12aad
## Shuruudaha xubinta Komishanka

1. Waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay.
2. Waa inaan da'diisu/da'deedu ka yarayn 40 jir kana waynayn 70 jir
3. Waa inuu Muslin yahay, kuna dhaqma diinta Islaamka.
4. Waa inuu leeyahay aqoon dugsi sare ugu yaraan ama wixii u dhigma.
5. Waa inaanu ka mid ahayn urur/xisbi siyaasadeed, kana madax banaan yahay.
6. Waa in lagu yaqaan dhawrsanaan, sharaf iyo cadaalad bulshada dhexdeeda.
7. Waa inaan dembi ciqaab oo maxkamad horteed kaga cadaadey ku dhicin welligiiba.
8. Waa inuu jidh ahaan iyo maskax ahaanba gudan karaa xilka.

## Qodobka 13aad
## Xil ka qaadista Komishanka

1. Xubnaha Komishanka waxa xilka lagaga qaadi karaa:-
   b. Markuu jabiyo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay.
   t. Marka uu xilka gudan kari waayo karti darro ama caafimaad darro awgeed
   j. Marka uu ku kaco anshax-xumo, xatooyo, musuq-maasuq iwm
2. Marka arrimaha kor ku xusan la dareemo, waxa Madaxweynuhu u magacaabayaa guddi-baadhiseed ka soo warbixisa si uu go'aan ugu qaato.
3. Xil ka qaadista Komishanka waxa awood u leh Madaxweynaha, waxase shardi ah in Golaha Wakiiladu ku ansixiyo xil ka qaadistaas cod hal-dheeri ah ( simple majority).
4. Marka ay banaanaato xubin Komishanka ka mid ahi, xil ka qaadis, geeri, ama is casilaad awgeed, waxa buuxinta jagadaas loo raacayaa habka xubintii banaysay ku timi.

## Qodobka 14aad
## Awoodaha Komishanka

Komishanku wuxuu awood u leeyahay:-

1. Inuu cayimo wakhtiga doorashooyinka la qabanayo, iyagoo Madaxweynaha u gudbinaya si uu Degreeto ugu soo saaro.
2. Inay cayimaan tirada iyo goobaha cod-bixinta degmooyinka & gobolada.
3. Inay magacaabaan, eryaan, anshax mariyaan shaqaalaha xafiiska dhexe, xafiisyada degmooyinka & Gobolada doorashooyinka.
4. Inay qorsheeyaan Miisaaniyadaha lagu maamulayo hawlaha doorashooyinka.
5. Inay ku dhawaaqaan natiijooyinka doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku xigeenka si ku meel gaadh ah, inta aan Maxkamadda Sare ku dhawaaqin.
6. Inay kormeeraan si kedis ah iyo si qorshaysanba goobaha doorashada iyo meel kasta oo hawshooda khusaysa.
7. Inay go'aan ka gaadhaan muranada doorashada ee ka soo gaadha xafiisyada hoos yimaada.
8. Inay sameeyaan daraasad ku saabsan sidii dalka loogu samayn lahaa goobo-doorasho oo murashaxiin ku tartami karto.
9. Inuu diiwaan-geliyo cod-bixiyayaasha ka hor taariikhda doorashada.

## Qodobka 15aad
## Miisaaniyadda Komishanka Doorashada

b. Komishanku wuxuu yeelanayaa Miisaaniyad gaar ah, oo ay soo qorshaysteen, una gudbinayaan Madaxweynaha, taas oo marka laysla ogolaado loo gudbinayo Golaha Wakiilada oo ansixinaya.

t. Miisaaniyadda doorashada waxay komishanku u isticmaalayaan si madax banaan, iyadoo ay waajib tahayinay xisaab-celin saddex biloodle ah u gudbiyaan Xisaabiayaha Guud.

## Qodobka 16aad
## Xafiiska goobta cod-bixinta

b. Xafiiska goobta cod-bixinta ee doorashu wuxuu ka koobmi doonaa Gudoomiye iyo laba hubiye. Hubiyaha ugu da'da weyn ayaa noqonaya gudoomiye xigeen. Waxa kale oo uu yeelanayaa xoghayn, iyo xubin shanaad oo noqonaysa mas’uulka ururinaaya cabashooyinka islamarkaana tilmaamaya codbixiyaasha (help desk officer).

t. Gudoomiyaha, Xoghayaha iyo labada hubiye waxaa magacaabaya Komishanka, waxaanu samayn karaa isku bedelid haddii loo baahdo.

j. Haddii loo baahdo oo arrin deg deg ahi timaado, Hubiye ama xoghaynta waxa bedeli kara gudoomiyaha goobta cod-bixinta, iyadoo cod-bixintu socoto, waxanu bedelkaas ka samayn karaa dadka goobta ku sugan ee leh xaqa cod-bixinta sida sharcigu xusayo.

x. Xafiiska goobta cod-bixintu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee goobta.

## Qodobka 17aad
## Xafiiska Degmada ee doorashada

1. Xarunta degmo kasta waxa jiraya xafiis doorasho degmo. Waxaanu ka koobmayaa Gudoomiye, Gudoomiye Ku-xigeen iyo hubiye.

2. Xafiiska doorashada ee degmadu waxa kale oo uu yeelanayaa xoghayn iyo laba tiriye.
3. Gudoomiyaha, Gudoomiye Ku-xigeenka, hubiyaha, xoghaynta iyo tiriyayaasha waxa magacaabaya Komishanka, isagaana awood u leh isku-beddelkooda.
4. Xafiiska degmada ee doorashu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee degmada.

## Qodobka 18aad
## Xafiiska Gobolka ee doorashada

1. Magaalo-madaxda gobol kasta waxaa jiraya xafiis doorasho gobol oo ka kooban Gudoomiye, ku xigeen iyo xoghayn oo uu soo magacaabay Komishanku.
2. Xafiiska gobolka ee doorashadu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee gobolka.

## Qodobka 19aad
## Hawl-wadeenada Xafiisyada Doorashada

1. Xubnaha Komishanku u magacaabo xafiisyada doorashada waa in loo sheego in xilka loo magacaabay ugu yaraan 60 (lixdan) maalmood ka hor taariikhda la qabanayo.
   Shuruudaha lagu soo xulanaayo Guddoomiyeyaasha Xafiisyada Doorashada Degmada iyo Gobolku waxa ay la mid yihiin kuwa lagusoo xulanaayo Komishanka Heer Qaran marka laga reebo da'da oo ah "in aanu/aanay da'diisu/da'deedu ka yarayn 36 jir kana waynayn 70 jir".
2. Qofkii loo magacaabo xilalka xafiisyada doorashooyinka marmarsiiyo shaqada loogama dayn karo, haddii aanu jirin cudurdaar dhab ah oo Komishanku ku qanci karo.
3. Xubnaha loo magacaabay xafiisyada doorashada ee goobaha, degmada iyo gobolka waxa dhaarinaya gudoomiyaha Maxkamadda degmada (dhaar fagaare), dhaartaas oo noqonaysa sidan:
   WAXA IGU WALAAHIYA OO IGU BILAAHIYA INAAN HAWSHA DOORASHADA U GUDAN DOONO SI XILKASNIMO, DAACADNIMO LEH. INAAN DHEX U AHAADO XISBIYADA/URURADA IYO MURASHAXIINTA, SHARCIGA IYO CADAALADNA AAN KU SHAQAYNAYO.
4. Komishanku waxay mid mid dhaarta kor ku xusan kaga hor dhaaranayaan Gudoomiyaha Maxkamadda Sare.
5. Xubnaha ciidamada qalabka sida ama kuwa leh qaab-ciidameed, Gudoomiyayaasha gobolada, degmooyinka, golayaasha degaanada, murashaxiinta u taagan doorasho looma magacaabi karo xafiisyada doorashooyinka.
6. Hawl-wadeenada goobaha cod-bixinta, kuwa xafiisyada doorashada degmooyinka/gobolada waxay mudada shaqadoodu ku dhamaanaysaa marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, hasa yeeshee Komishanku wuu kordhin karaa mudada shaqada intii uu u baahdo.
7. Gudoomiyayaasha xafiisyada doorashada degmooyinka iyo gobolada ma noqon karaan shaqaale dawladeed, ciidan qaran, xubin xisbi/urur. Shuruudaha lagu soo xulanayaa waxay la mid yihiin kuwa Komishanka lagu soo doortey.

## Qodobka 20aad

**Gunnada Hawl-wadeenada**

1. Gunnooyinka ay qaadanayaa hawlwadeenada xafiisyada doorashooyinka waxa qorshaynaya Komishanka, iyagoo ku salaynaya xilalka hawlwadeenadu ku kala magacaaban yihiin.
2. Hawlwadeenka loo diro hawl meel ka baxsan halka uu ku noolaa wuxuu yeelanayaa gunno-saad (subsistence allowance) mudada uu maqan yahay, waxana qorshaynaya Komishanka.

**Qodobka 21aad**
**Dhawrsanaanta Komishanka, Murashaxiinta, Hawl-wadeenada**

1. Dhamaan hawl-wadeenada ka hawlgelaya xafiisyada doorashooyinka, wakiilada Ururada/xisbiyada ee xeerkani tilmaamay waxay sharci ahaan (legal status) la mid yihiin saraakiil guud (puplic officer).
2. Murashaxiinta, hawl-wadeenada xafiisyada doorashooyinka iyo wakiilada xisbiyada lama xidhi karo xilliga doorashada, haddii aan la qaban iyagoo dembi ciqaabtiisu gaadhayso 3 sano faraha kula jira.
3. Haddii uu dembi galo waxaa lagu soo oogi karaa marka ay doorashadu dhamaato ee laga wareejiyo hawsha uu u xil saarnaa.
4. Komishanku wuxuu leeyahay dhawrsanaan la mid ah ta Golaha Wasiirada mudada uu xilka hayo. Dhawrsanaan ka qaadistoodana waxa loo marayaa sida uu tilmaamayo qodobada 94(8) iyo 96(4) ee Dastuurka.

**<u>QAABKA DOORASHADA</u>**

**<u>Qodobka 22aad</u>**
**<u>Habka Doorasho</u>**[6]

1. *Xisbi/Urur kasta oo doonaya in uu ka qayb-galo doorashada Golayaasha Deegaan, waa in uu komishiinka Qaranka u gudbiyo liiska musharaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in komishinku siiyaa musharax kasta Astaan u gaar ah.*
   Hasa yeeshee doorashada Madaxweynaha iyo Ku xigeenka Madaxweynaha waxay noqonaysaa habka aqlabiyadda hal-dheeriga ah (majority system), sida dastuurku tilmaamay.
2. *Kuraasta Degmo-doorasho, waxaa Axsaabtu/Ururadu ku kala helayaan habka saami qaybsiga (Proportional Representation System) ee kuraasida iyo codadka xisbi/Ururkasta ka helo Degmadaas, iyadoo uu xisbiga/Ururkuna ay musharaxiintiisu ku kala guulaysanayaan sida ay u kala codbadan yihiin.*
3. *Musharaxiinta ku guulaysan waaya doorashada Deegaanka waxay noqonayaan kayd, iyadoo loo kala qaadanayo sida ay u kala codbadan yihiin, marka xubin ama xubne ka mid ah Golaha Deegaanku uu baneeyo xilka.*

[6] Wax ka Beddelkan waxa lagu sameeyey Lifaaqa 3aad ee Xeerkan oo hirgelay 13 Diisambar 2011

## Qodobka 23aad
## Qaabka soo bandhigida Murashaxiinta

1. Liiska murashaxiinta golaha degaanka waxaa soo bandhigaya Guddiga degmada ee Ururka/xisbiga, waana in si cad loo soo muujiyaa magaca murashaxa oo saddexan, meesha uu ku dhashay iyo sanadkii uu dhashay; haddii ay jiraan dad isku magacyo ah waa in la sheego naanysta (haddii ay jitro) iyo magaca oo afaran, waxa kale oo la soo muujinayaa degmada laga sharaxay.
2. Liisaska murashaxiinta ururka/xisbiga waxa kale oo la soo raacinayaa:-
   b. Caddeynta shaqo ka tegidda ee ku xusan qodobka 7aad ee xeerkan
   t. 4 koobi oo ay si wanaagsan uga muuqato astaantii ururku/xisbigu.
   j. Caddeyn uu bixiyey murashax kastaa oo uu ku muujiyey inuu ogol yahay murashaxnimada iyo inuu buuxiyey shuruudaha ku xidhan.
   d) Rasiidhada bixinta deebaajiga murashaxnimo ee Wasaaradda Maaliyadda eeku xusan qodobka 25aad ee xeerkan.
3. Sida ay murashaxiintu liiska ugu kala horeeyaan ee la isugu xigsiiyey ayaa loo aqoonsanayaa in loo soo kala doortey ururka/xisbiga gudihiisa.
4. Muran kasta oo ka dhasha xeraynta ama bandhigga liis murashaxiin oo ka dhex dilaaca xisbi/urur gudahiisa waxa go'aan ka gaadhaya golaha dhexe ee xisbiga/ururka arrintu khusayso.
5. Murashaxa isusoo sharraxay Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisu waxa uu xaq u leeyahay in uu ka tanaasulo. Haseyeeshee waa in uu qoraal rasmi ah usoo gudbiyo Xisbigii uu ka sharraxnaa iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka ugu yaraan 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Xisbigii uu murashaxaasi ka sharraxnaa waxa uu soo beddeli karaa oo keliya 7 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
6. Haddii mid ka mid ah murashaxiinta Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisa ee Xisbiyada Siyaasaddu uu geeriyoodo ka dib marka la soo gudbiyo liiska murashaxiinta, waxa uu Xisbiga ay khusaysaa xaq u leeyahay in uu soo beddesho 7 (toddoba) maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Haddii uu murashaxu geeriyoodo 7da maalmood ee ugu dambeeya gudahooda, Xisbigaasi xaq uma laha in uu soo beddesho. Xaaladaha ku saabsan bannaanaanshaha Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenka ee ku xusan Qodobbada 86aad iyo 89aad ee Dastuurka, waxaa loo tixraacayaa Dastuurka.
7. Haddii muddada lagu cayimay faqradaha 5aad iyo 6aad ee toddobada maalmood ah ay Xisbiyadu kusoo beddeli waayaan Murashaxii ay jagadiisu bannaaanaatay sababaha ku xusan faqradahaas awgood, magaca murashaxa jagadiisu bannaanaatay ayaa lagu tartamayaa.

## Qodobka 24aad
## Astaamaha Liistooyinka Murashaxiinta

1. Astaamaha liisaska murashaxiinta ee ururada/xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.

2. Xisbi/ururna waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi/urur kale hore ugu isticmaalay doorasho hore.
3. Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga, hase yeeshee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo.
4. Xisbi/urur wuxuu isticmaalayaa astaan keliya markuu soo bandhigayo murashaxiintiisa heerka degaanka ama Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa.

**Qodobka 25aad**
**Deebaaji**

Murashaxiinta u tartamaya xilalka waxay bixinayaan deebaaji aan celin lahayn, oo kala noqonaya sidan:-

a) Sl.Sh. 5,000,000 (Shan Milyan oo Shilin) Murashaxiinta Madaxtooyada midkiiba
b) Sl.Sh 1,000,000 (hal Milyan oo Shilin) Murashaxiinta Golayaasha Deegaanka midkiiba.

**Qodobka 26aad**
**Qabashada Liisaska Murashaxiinta**

1. Liistooyinka murashaxiinta Madaxweynaha & ku xigeenkiisa waa in la geeyo xafiiska Komishanka, kuwa murashaxiinta degaanadana la geeyo xafiisyada doorashada ee degmooyinka ka hor 6da galabnimo maalinta 45aad intaanay cod-bixintu dhicin, iyadoo ay dhan yihiin lifaaqyadiisa ku tilmaaman xeerka.
2. Xafiiska Komishanka ama xafiisyadiisa doorashada ee degmooyinka waxay hubinayaan in murashaxiinta liisaska ku qorani buuxinayaan dhamaan shuruudaha u dhigan heerkooda, Murashaxa aan buuxin shuruudaha waxa lagu celinayaa urur/xisbigii soo sharaxey si ay bedelkiisa u keenaan muddo loo cayimey.

**Qodobka 27aad**
**Sheegidda Liisaska Murashaxiinta**

1. Komishanka iyo xafiisyadooda degmo kasta waa inay diyaariyaan qaabka sheegidda murashaxiinta iyagoo u habaynaya siday u kala horeeyaan, kana muuqato astaamahoodii.
2. Komishanka iyo xafiisyadiisa goob kasta oo cod-bixineed waa inay qoraal ahaan diyaariyo qaab sheegid liisaska murashaxiinta degmada iyadoo lagu dhajinayo goobaha cod-bixinta degmada.
3. Komishanka iyo xafiisyadiisu waa inay 30 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta ku dhajiyaan liisaska murashaxiinta degmada goobaha fagaarayaasha, boodhadhka ogeysiiska, xafiisyada Dawladaha Hoose iwm, sidoo kale waa in suuqa lala maro oo cod baahiye lagu sheego, haddii ay suuragal tahayna idaacadda laga sheego ama wargeysyada lagu baahiyo.

**OLOLAHA DOORASHOOYINKA**

**Qodobka 28aad**
**Bilowga iyo Dhamaadka Ololaha doorashada**

1. Ololaha doorashooyinku wuxuu bilaabmayaa marka la soo dhejiyo ogeysiiska ku xusan qodobka 27aaad ee xeerkan, waxaanu dhamaanayaa 48 saac ka hor taariikhda la qabanayo cod-bixinta.
2. Haddii muddada olole Doorasho ku beegmo bisha barakaysan ee Ramadaan, si xisbigii doonaa uu miisaanka ololihiisa uga soo hormariyo bisha Ramadaan, waxa ololaha Doorashadu bilaabmayaa 60 (lixdan) maalmood ka hor maalinta cod-bixinta, waxaanu dhammaanayaa 48 saacadood ka hor maalinta cod-bixinta.
3. Ololaha Madaxtooyada ee xilligani (Doorashada Madaxtooyada ee sannadka 2010) waxa uu noqonayaa muddo saddex todobaad ah (21 maalmood). Waxa uu Ololuhu bilaabmayaa 23 maalmood ka hor maalinta doorashadu ay dhacayso, waxaanu dhammaanayaa 48 saac ka hor maalinta codbixinta. Hase yeeshee, haddii Ololaha Doorashadu uu ku beegmo bisha Ramadaan waxaa la adeegsanayaa Qodobka 28aad , faqradda 2aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Lifaaqa u ah Xeer Lr. 20/2001 ee Golaha Wakiilladu ansixiyay 26/07/2009

## Qodobka 29aad
## Qabashada shirarka & Banaan-baxyada

1. Dadka qabanqabinaya shirarka iyo banana-baxyada la xidhiidha ololaha doorashada waa inay qoraal ku ogeysiiyaan Gudoomiyaha Degmada iyo Saldhigga booliska ay khusayso 48 saacadood ka hor wakhtiga la samaynayo. Gudoomiyaha degmadu wuu diidi karaa in la sameeyo shirarkaas ama banaan-baxaas, haddii uu ku qanco in waxyeelo loo gaysanayo caafimaadka, anshaxa, ama nabadgelyada guud iwm, waxaana ku waajib ah inuu amro in shirarkaas ama banana-baxaas lagu qaban karo meel uu tilmaamay ama wakhti uu cayimay
2. Magaalo ama tuulo laguma wada qaban karo maalin qudha wax ka badan laba shir iyo banaan-bax.

## Qodobka 30aad
## Muuqaalka boodhadhka

1. Muuqaalka boodhadhka iyo waraaqaha dacaayadaha ololaha doorashada waa in la geeyo xafiiska Gudoomiyaha degmada 48 saac ka hor intaan shaaca laga qaadin. Mana jirto wax cashuur ah oo laga bixinayo arrintaas.
2. Lama ogola in boodhadhka iyo waraaqaha ololaha doorashooyinka lagu dhejiyo masaajidada, xafiisyada & gaadiidka dawladda, xarumaha diplomaasiyiinta & ururada caalamiga ah iwm.

## Qodobka 31aad
## Hub iyo Lebbis Ciidanimo

Shirarka iyo banaan-baxyada ololaha doorashooyinka waxa ka reebban in loo qaato HUB iyo lebbis ciidan ama wax u eg.

## Qodobka 32aad
## Wakiilada Axsaabta/ururada

1. Guddiyada dhexe ama kuwa gobolada/degmooyinka ee ururadu/xisbiyadu waxay wakiil leh xaqa cod-bixinta u soo diran karaan goob kasta oo cod-bixin ka dhacayso oo ay murashaxiin ku leeyihiin. Waxa kale oo ay keeni karaan bedelkiisa haddii uu maqnaado.
2. Wakiilada ay ururadu/axsaabtu soo dirsadeen waa inay goob-joog ahaadaan marka xafiiska doorashadu hawsha hayo, soona jeediyaan wixii tabasho ama caddeyn ay qabaan (haddii ay jirto), taas oo la diiwaangelinayo.
3. Magacyada wakiilada ururada/xisbiyada waa in loo geeyo Komishanka ama xafiisyadiisa 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Komishanka ama xafiisyadiisu wuxuu siinayaa wakiil kasta qoraal ogolaansho ah oo u fasaxaya inuu geli karo kana hawl geli karo goobta cod-bixinta ee loo soo diray

**DOORASHADA GOLAYAASHA DEGAANKA**

**Qodobka 33aad**
**Shuruudaha Murashaxa Golaha Degaanka**

1. Waa inuu yahay muwaadin u dhashay Somaliland
2. Waa inuu si rasmi ah u degan yahay degmada uu iska sharaxayo
3. Waa inuu muslin yahay kuna dhaqmaa diinta islaamka.
4. Waa inaan da'diisu ka yareyn *25 sano*[7] sanadka doorashada la qabanayo
5. Waa inuu ku sifoobay xilkas, dhaqan toosan bulshada dhexdeeda.
6. Waa in aanu ku dhicin xukun ciqaabeed oo maxkamad horteed kaga cadaadey 10kii sano ee u dambeeyay.
7. Waa inuu leeyahay aqoon dugsi sare haddii uu iska sharaxayo degmooyinka darejada A iyo B. Hadii uu iska sharaxayo degmooyinka derajada C iyo D waa inuu lahaado aqoon dugsi dhexe ugu yaraan ama wixii u dhigma.
8. Waa inuu yahay cashuur bixiye degmada uu degan yahay ama uu ka qayb qaatey si mutadawacnimo ah hawlo dan guud ah ee degmadaas.

**Qodobka 34aad**
**Ururada u gudbi waaya xisbi**

~~Ururada ku guulaysan waaya inay u gudbaan xisbi hasayeeshee, doorashada Golayaasha degaanka ee degmooyinka qaarkood ku guulaysta kuraas, waxa ku waajib ah inay ku biiraan saddexda xisbi ee la ansixiyey midkood.~~
*[**Fiiro Gaar ah:** Qodobkan waxa bedellay oo halkiisii galay Qodobka 24(1)[8] ee Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axaabta Siyaasada, Xeer Lr. 14/2001]*

---

[7] Lifaaqa Sedexaad ee wax ka bedelka Xeerkan oo hirgalay 13kii Diisambar 2011 ayaa da'da u bedellay 25 sanno oo markii hore aheyd 35.

[8] Qod. 24(1): "Xisbi kasta/Urur oo ku guulaysan waaya doorashada Golayaasha deegaanka waxay ku biirayaan iyaga iyo Xubnahooda golayaasha deegaanka ee ay ka helaan degmooyinka dalka saddexda xisbi qaran ee soo baxay kay doonaan, waxayna qoraal ahaan ugu gubinayaan Gudidda Diiwaangalinta mudo aan ka badnayn hal bil (30 maalmood)."

## DOORASHADA MADAXWEYNAHA IYO KU XIGEENKA MADAXWEYNAHA

### Qodobka 35aad
### Shuruudaha Murashaxa Madaxweynaha & Ku xigeenka Madaxweynaha

1. Shuruudaha murashaxa Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waxay ahaanayaan kuwa ku tilmaaman Dastuurka qodobka 82aad.
2. Xubnaha isu taagaya doorashada Madaweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waa inay ka mid yihiin urur/xisbi diiwaan-gashan ama ansaxsan, soona sharaxay.

### Qodobka 36aad
### Habka Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha

Habka lagu dooranayo Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha wuxuu ahaanayaa kan ku tilmaaman Dastuurka qodobka 83aad, faqradihiisa 1, 2, 3, iyo 4aad.

## NIDAAMKA MAAMULKA DOORASHADA

### Qodobka 37aad
### Qalabka xafiisyada Doorashooyinka

1. Komishanka Qaranka ee doorashooyinku waa inay goob cod-bixineed kasta u diyaarisaa qalabkan:
   b. Nuqul xeerkan ka mid ah.
   t. Xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shaambaddii goobta cod-bixinta oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.
   j. Xidhmo lingaxan oo ay ku jiraan waraaqihii cod-bixintu.
   x. Sanaadiiqdii cod-bixinta lagu ridayay.
   kh. Weel lagu qaado waraaqaha cod-bixinta.
   d. Saddex foom oo lagu qoro hawlgalka cod-bixinta.
   r. Foom leh khaanado jeexjeexan.
   s. Qalimo-biiro ku filan calamadaynta warqadaha cod-bixinta. Ugu yaraan 5 waraaqadood oo tusinaya qaabka cod-bixiyayaashu u calaamadaynayaan warqadaha cod-bixinta.
   sh. Quraarad ah khadka aan tirtirmi Karin ee la marinayo cod-bixiyayaasha.
   dh. Qalabka qoraalada kala duwan ee loo baahan karo.
   ~~*c. Mastarad aanu dheererkeedu ka yaraanin khaanadaha liiska ee cod-bixiyaha macluumaadkiisu ku qoran yihiin*~~*.*
2. Qalabka ku xusan c, d, e, f, g ,[9] ee ku tilmaaman faqradda xubinta hore waa inay ahaadaan laba laba oo si fiican loo kala calaamadiyaa haddii wadajir loo qabanayo doorashooyinka Degaanka.

[9] Af Soomaliga xrafyadin waa j, x, kh, d, r.

3. Komishanku waa inay xafiiska dhexe ee doorasho iyo degmo/gobol kasta u diyaarisaa qalabkan:
   B. Nuqul xeerkan ah
   T. Xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shambaddii xafiiska degmada, gobolka ee doorasho oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.
   J. Saddex foom oo lagu qorayo hawlgalka cod-bixinta xafiiska doorashada ee degmada/.gobolka.
   X. Foom leh shax jeexjeexan (tabulation forms)
   KH. Qalabka wax lagu qoro oo kala duwan (stationary)
   ~~D. *Liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha degmada/gobolka*~~
4. Qalabka xafiis kasta oo doorasho waa in lagu rido saxarad gaar ah. Saraxadda waa in la xidho oo la lingaxo. Komishanku waa inay qalabkaas dirto wakhti ku haboon iyadoo la socdaan sanaadiiqdii codka lagu ridayey, waxaana loo dirayaa xafiisyada doorashada degmada/gobolka oo u sii gudbinaya goobaha cod-bixinta
5. ~~*Komishanku wuxuu tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta codbixinta ku jaan-go'anayaa tirada cod-bixiyeyaasha goobta cod-bixinta ee ku cad liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha goobtaas cod-bixineed oo lagu daray tirada dadka ka hawlgelaya goobta cod-bixinta oo ka kooban hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka boliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixinta.*~~
   ~~*b. Komishanku wuxuu goob kasta oo cod-bixineed u diyaarinayaa waraaqo cod- bixineedoo dheeraad ah oo aanay tiradoodu ka badnayn 2% tirada waraaqaha ee ku xusan xubinta "a" ee farqaddan , lambarradooda iyo goobaha cod-bixineed ee loo kala dirayana lagu qorayo diiwaan gaar ah oo Komishanka Doorashooyinka Qaranku leeyahay; waxaana goobta loogu ridayaa baqshad xidhan oo gaar ah oo lagu rido sanduuqa doorashada ee goobta cod-bixineed.*~~
   ~~*t. Waraaqaha dheeraadka ah waxa loo adeegsanayaa oo keliya beddelaadda waraaqaha cod-bixineed ee xumaada intaan lagu codeyn, taas oo ay waajib tahay in ay ku wada qancaan gudoomiyaha iyo wakiilada axsaabta u jooga goobta codbixinta. Mar kasta oo warqad ka mid ah waraaqaha dheeraadka ah lagu codeeyana waa in la diiwaan-gelinayaa asbaabaha kalifay.*~~

*[**Fiiro Gaar ah:** Qodobadan oo ah kuwii 2001kii ee lagaga saarey Xeerka wax ka bedelkii 2009kii ayaa dhigheyey nidaamka loo maamulayo waraaqaha codbixinta ee dheeraadka ah ee loo bahandoono, waana lagu isticmaalikaraa doorasha golayaasha deegaanka ee 2012 oo keliya:*

5. *Komishanku waa inay xafiisyadooda degmo/gobol u diyaariso waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah oo ku lingaxan kiishash si loo siiyo xafiiska doorasho ee soo codsada, iyadoo ay waajib tahay in ay soo sababeyaan, waxana la gudoonsiinayaa gudoomiyaha goobta cod-bixinta.*
6. *Meelaha is gaadhsiintu adag tahay Komishanku wuxuu u dhiibi karaa waraaqaha cod-bixinta oo lingaxan oo dheeraad ah kormeerka doorashada ka hawlgalaya si uu u hayo xafiiska doorashada ee degmada/gobolka.]*

## Qodobka 38aad
## Waraaqaha Cod-bixinta

Waraaqaha cod-bixinta waa inay ku daabacan yihiin astaamaha ururada/xisbiyada oo kor u taagan si afar gees ah. Astaan kastaa waa inay leedahay meel banaan oo loogu talagalay inuu cod-bixiyuhu ku muujiyo codkiisa. Waraaq kastaana waa ianay leedahay cidhif yar oo xabagaysan oo lagu rogo warqadda cod-bixinta oo lagu lingaxo.

**Qodobka 39aad**
**Habaynta Liisaska rasmiga ah iyo goobaha codbixineed**

a. Goob kasta oo codbixinta laga dhiibanayaa waa inay lahaato laba qol oo yar yar oo loogu talagalay in lala galo calaamadaynta waraaqaha cod-bixinta loona habeeyo in qarsoodi codka lagu hubiyo
t. Sanaadiiqda cod-bixinta lagu ridayaa waa inay yaaliin meel muuqata ama hareeraha ka xigaan miisaska Gudoomiyaha goobta cod-bixinta.
~~*j. Liiska dadka ka diiwaan-gashan isku goob doorasho, waxay qoraal ahaan u kala horreynayaan siday xuruuftu u kala horreeyaan iyadoo laga duulayo magacooda 1aad haddii ay ku kala bixi waayaana magacooda 2aad, hadii ay kaas ku kala bixi waayaana kooda 3aad, haddii kaas ka sinmaanna kooda 4aad.*~~

**Qodobka 40aad**
**Ogeysiinta Liiska Murashaxiinta**

1. Halka nuqul ee ku xusan qodobka 27aad ee xeerkan waa in lagu dhejiyo meel la wada arki karo oo ka mid ah xafiiska doorashada ama goobta cod-bixinta gudaheeda iyo dibeddeedaba
2. Nuqulka ogaysiinta ee ku xusan qodobka 27aad ee xeerkan oo Komishanku ka soo sameeyay liiska murashaxiinta oo u kala horeeya sidii loogu soo gudbiyay waa in lagu dhejiyo banaanka xafiisyada doorashada iyo gudaha meel la wada arki karo.

**Qodobka 41aad**
**Qaybinta Qalabka Doorashada**

1. Xafiiska doorashada degmadu waa inuu hubiyo in goob kasta oo cod-bixin ka dhacayso in la geeyo wixii qalab ah ee loo baahan yahay markay saacadu tahay 6:00 saac ee subaxnimo ka hor maalinta cod-bixinta.
2. Komishanku Waa inuu geeyo xafiiska doorashada degmada qalabka loogu talagalay cod-bixinta ugu dambayn 4ta galabnimo maalinta ka horaysa cod-bixinta.
3. Goob kasta oo cod-bixineed waa in la siiyo:-
   b. Nuqul muujinaya magacyada hawlwadeenada goobta
   t. Nuqul muujinaya wakiilada ururada/axsaabta ee goob-jooga ahaanaya.

**Qodobka 42aad**
**Xafiiska Goobta cod-bixinta**

1. Gudoomiyaha goobta cod-bixintu markuu helo qalabka ku xusan qodobka la soo dhaafay waa inuu:-
   b) Dhiso xafiiska oo uu hubiyayaasha iyo xoghaynta u sheego inay yihiin hawlwadeenadii goobta isla markaana la socodsiiyo sida ay hawsha loo xilsaaray u gudanayaan, Mas'uulka ururinaaya cabashooyinku uu ka mid noqdo shaqaalaha Xafiiska Goobta cod-bixinta.
   t) Hubiyo in Wakiilada axsaabta/ururada ee loo soo ogolaaday inay goob-joog ahaadaan inay joogaan.
   j) Markuu hubiyo inay saxaraduhu lingaxan yihiin waa inuu furo saxarada oo hubiyo inay dhan yihiin qalabkii, waana inay goob-joog ahaadaan Hawl-wadeenadii goobta iyo wakiiladii ururada/axsaabtu.
   x) Markuu hubiyo isaga iyo hawl-wadeenadiisa iyo wakiiladu in xidhmooyinka ay ku jiraan shaambadda goobta iyo waraaqaha cod-bixintu lingaxan yihiin, waa inuu furo xidhmooyinka oo waraaqaha cod-bixinta la dhaco shaambada goobta, oo si nidaamsan ugu rido weel xafidan. Waxaa reebban inay markaas joogto qof aan ahayn inta goobta ku qoran.
   kh) Inuu hubiyo in ogeysiinta ay ku qoran yihiin tilmaamaha cod-bixinta iyo liisaska murashaxiintu ku dhegan yihiin meelihii loogu talagalay.
   d) Inuu hubiyo in qalabkii loo baahnaa ee cod-bixinta loogu talagalay loo agaasimay sida xeerku tilmaamayo, si hawsha doorashu si hufan ugu hirgasho.
2. Waa inuu diiwaan-geliyo dhamaan hawlgalka kor ku xusan in la fuliyey. Qoraalka waa inay ku cadaato shaambadda goobta, tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta cod-bixintu heshay.
3. Waa inuu markaa ka saxeexo hawlwadeenada iyo wakiiladaba in wax waliba sidii loogu talagalay yihiin.
4. Markuu hubiyo Gudoomiyaha goobta cod-bixintu in hawshaasi qabsoontay waa inuu ku dhawaaqo in cod-bixintu furan tahay.
5. Haddii ay Xisbiyada Siyaasaddu goob cod-bixineed usoo diran waayaan wakiillo, hawsha doorashadu u xannibmi mayso, hawl-wadeennada Komishanka ee goobtuna shaqadooda way wadanayaan.

## Qodobka 43aad
## Awoodda Gudoomiyaha Goobta cod-bixinta

1. Gudoomiyaha goobta cod-bixinta waxa waajib ku ah inuu ilaaliyo nidaamka inta doorashadu socoto. Booliska ayuu ku amri karaa inuu qof goobtaa dibedda uga saaro ama in la qabto qof gef ku sameeyay hawsha doorashada ama qof waali ka muuqato
2. Booliska looma ogola inuu galo gudaha goobta cod-bixinta haddii aanu Gudoomiyuhu amrin
3. Saraakiisha Booliska iyo kuwa shaqaalaha dawladda waa in ay fuliyaan codsiyada Gudoomiyaha goobta si loo hubiyo in si dhib yar codka loo bixiyo oo aanay dhicin in lagu ururo miiska hawlwadeenada ama goobta agteeda.
4. Gudoomiyaha goobta cod-bixinta iyo kuwa xafiiska dhexe waxay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan awoodaha ku qoran xubnaha qodobkan.

## Qodobka 44aad
## Gelidda Goobta Cod-bixinta

1. Xafiiska goobta cod-bixinta waxa geli kara dadka maamulaya xafiiska iyo kuwa ka wakiilka ah axsaabta/ururada iyo kuwa codka bixinaya.
2. Waxa reebban in cod-bixiyayaashu hub la yimaadaan goobta, markiiba qof ayaa gelaya, iyadoo lookala hor marinayo sidii loo soo kala horeeyay, hasa yeeshee waa la tixgelin karaa inuu ugu hormaro haddii ay jirto qof ka shaqaynaya hawsha doorashada oo doonaya inuu codkiis a bixiyo.

## Qodobka 45aad:
## Talaabooyinka Ka Horeeya Cod-bixinta

~~*Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa dhiiban karaa ka dib marka:*~~

~~*1. uu kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye-Ku-Xigeenka goobta Cod-bixinta (ahna labada hubiye kooda da'da weyn), si uu u hubiyo inuu yahay kaadh cod-bixineed oo sax (valid) ah, horena aan loogu soo codey isagoo ka hubbinaaya tilmaamaha kaadhka cod-bixiyaha liiska cod-bixiyaasha ansaxa ah. Isla markaana hubiyo in far-yaradiisa bidix, haddii aanu lahaynna far-yaradiisa midig, haddii aanu taana lahaynna meelaha muuqda ee jidkiisa inaanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gudbiyo xoghayaha goobta, iyadoo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiillada Xisbiyadu, haddii ay goobta ku sugan yihiin.*~~

~~*Goobta cod-bixineed ee cod-bixiyeyaashoodu ka bataan 750 codbixiye waxa loo kala jabinayaa (qaybinayaa) laba sanduuq oo ah A & B.*~~

~~*2. uu xoghayaha goobtu ka helo magaca kaadhka ku qoran liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha goobta, isla markaana uu hubiyo inay is waafaqsan yihiin lambarka kaadhka ku qoran iyo lambarka kaadhka ugu diiwaan-gashan liiska cod-bixiyeyaashu, dabadeedna uu codbixiyuhu suulka bidix saaro meesha liiska cod-bixiyeyaasha ah ee loogu tala-galay.*~~

~~*3. uu tallaabooyinka faqradaha sare ee qodobkan ku xusan u gutto si dhamaystiran oo nidaamka waafaqsan, kuna wada qancaan hawlwadeenada iyo wakiilada Axsaabta ee goobta codbixinta ku sugani ayaa cod-bixiyaha loo goyn karaa warqadda cod-bixinta.*~~

*[**Fiiro Gaar ah**: Qodobkan waxaa bedellay markii hore 2009kii, faqradiisa 1aadna waxaa sii bedeshay in yar wax ka bedelkii 2010kii oo dartay kal qaybinat goobaha codbixiayaasha ee ay ku diiwaangelsanyihiin dad ka badan 750. Bedellaadahan oo dhan waxya la xidhiidheen diiwaangelinta, marakaa waa laalay, waxaana lagu dhaqmi karaa doorashada gaolayaasha deegaanka ee 2012 oo kaliya qodabkii hore ee 2001kii oo ahaa sidan:*

*1. Cod-bixiye kasta wuxuu codkiisa dhiiban karaa markuu:-*
*b. Bixiyo tilmaamihiisa ku saabsan magaciisa, aqoonsigiisa iyo da'diisa.*
*t. La hubsado inuu xaq u leeyahay cod-bixinta oo buuxinayo shuruudaha cod-bixinta, iyadoo si guud mar ah looga eegayo aqoonsigiisa, waraaqaha uu sito, marag-muujin kale ama sidii kale ee kolba loo caddayn karo.*

*2. Calaamad khad aan tirtirmi Karin laga mariyo cidida far-yarada gacanta bidix, haddii gacanta bidix maqan tahayna waa in cidida far-yarada gacanta midig laga mariyo, haddii*

*ay labada gacmood maqan yihiin waa in laga mariyo meel kale oo jidhka cod-bixiyaha oo la arki karo.]*

**Qodobka 46aad**
**Cod-bixiyayaasha aan codka dhiiban Karin**

1. Waxa codkisa dhiiban kara cod-bixiyaha taga goobta cod-bixinta oo codkiisa ku ridi kara sanduuqa.
2. Haddii uu jiro qof ay naafonimo u diidey inuu codkiisa bixiyo Gudoomiyaha goobta cod-bixinta ayaa u ogolaanaya in cod-bixiye kale oo uu aaminsan yahay inuu gacan siinayo oo ka caawiya sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa.
3. Xoghayaha goobta cod-bixinta ayaa qoraalka gelinaya sababta loo ogolaaday in qofkaas naafada ah laga kaalmeeyo sidii uu codkiisa u bixin lahaa, waxa kale oo uu qoraalka ku muujinayaa qofka naafada ah iyo qofka kaalmeeyey.

**Qodobka 47aad**
**Nidaamka cod-bixinta**

~~*1. Marka la dhammays-tiro hawlaha ku xusan qodobka 45aad ee cusub (as amended) ayuu xoghayuhu*~~
~~*b. cod-bixiyaha u goynayaa warqadda codbixinta isagoo xaqiijinaya in dabadii hadhaaga ahayd ee warqaddaa cod-bixineed ku hadhay buugga, u shaambadaynayaa, kuna wareejinayaa si uu ugu soo codeeyo;*~~
~~*t. kaadhka cod-bixyaha u gudbinayaa Hubiyaha kale ee goobta;*~~
~~*i. xariijin ka tallaabinayaa magaca cod-bixiyaha iyo dhammaan xogta kale ee cod-bixiyaha ee ku qoran khaanadaha cod-bixiyahaas ee liiska, isagoo adeegsanaya mastaradda iyo qalin, ilaaliyana in magaca cod-bixiyaha iyo xogtiisa kaleba la akhriyi karo xarriijin-marinta ka dib.*~~
~~*2. Haddii uu arko cod-bixiyuhu intaanu codayn in warqadda cod-bixintu aanay dhammayn ama ay jeexan tahay, wuu soo celinayaa, waxaanu codsanayaa in loo beddelo, dhacdadaasna waa in la diiwaan-geliyaa.*~~
~~*3. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed gelayaa qolka yar ee waraaqaha lagu soo calaamadiyo.*~~
~~*4. Isagoo adeegsanaya mid ka mid ah qalimmada goobta, ayuu cod-bixiyuhu calaamadinayaa meel ka mid ah qaybta warqadda ee u gaarka ah xisbiga/musharraxa uu doonayo inuu u codeeyo, dabadeedna uu soo laalaabayaa warqadda kana soo baxayaa qolka calaamadinta warqadda.*~~
~~*5. Intaa ka dib ayuu cod-biixyuhu wuxuu ku ridayaa warqaddisa cod-bixinta sanduuqa cod-codbixinta.*~~
~~*6. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed u imanayaa Hubiyaha labaad ee loo soo gudbiyey kaadhkiisa, kaasoo far-yaradiisa bidix u marinaya khadka aan masaxmin, haddii aanu far-yaro bidix lahaynna, far-yarada gacanta midig, haddii aanu labada far-yaro midna lahaynna farta kale ee u soo xigta iyadoo gacanta bidix mudnaanta khadaynta la siinayo, haddii aanu labada gacmood midna lahaynna meeshii kale ee jidhkiisa ah ee muuqanaysa.*~~

7. ~~*Qof kasta oo ka mid ah hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka boliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu, wuxuu codkiisa dhiiban karaa (isagoo u maraya tallaabooyinka ku xusan 1 – 6 ee qodobkan) Isla marka goobta codbixinta la diyaariyo, ee hawlwadeennada Goobta cod-bixinta iyo wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixintu ay isla hubiyaan in kaadhka qofkaasi yahay mid sax (valid) ah horena aan loogu soo codayn, foomka uu Komishanka Doorashooyinka Qaranku u soo diyaariyeyna lagu qoro:*~~
   ~~*b. magaciisa oo afarran;*~~
   ~~*t. lambarka iyo magaca goobta uu ka diiwaangashan yahay;*~~
   ~~*j lambarka iyo magaca goobta uu ka codaynayo;*~~
   ~~*x xilka uu ka hayo goobta cod-bixinta;*~~
   ~~*kh. saxeexa suulkiisa bidixna uu dhiga meesha foomka loogaga talo- galay.*~~
9. ~~*Qof kasta oo ka mid ah dadka ku xusan faqradda 8[aad] ee qodobkan waxa kaadhkiisa codbixinta haynaya Guddoomiyaha goobta codbixinta oo dib u siin karaa uun ka dib marka la soo gebagebeeyo hawsha doorasho ee goobta cod-bixinta.*~~
10. ~~*Guddoomiyaha goobtu wuxuu ku ilaalinayaa hawlwadeennada kale ee Xafiiska doorasho ee goobta gudashada xilkooda, waxaanu u gacan-bannaanaanayaa kala-socodsiinta hawsha goobta.*~~
11. ~~*Guddoomiyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu debedda uga saaro cod-bixiyaha cudur-daar la'aan dhex meeraysta goobta iyo inuu cod-bixiyahaas dib uga soo celiyo warqadda cod-bixinta. Cod-bixiyahaas waxa loo oggolaanayaa inuu codkiisa dhiibto ka dib marka dadka safka taagani codkooda wada dhiibtaan.*~~
12. ~~*Haddii uu cod-bixiye la yimaaddo goob cod-bixineed kaadh aan waafaqsanayn goobtaas, Guddoomiyuhu wuxuu u tilmaamayaa goobta cod-bixineed ee uu kaadhkiisu waafaqsan yahay.*~~
13. ~~*Cod-bixiye kasta oo sita kaadh cod-bixineed oo aanu lahayn ama waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah ama ka duwan kuwa la isticmaalayo, Guddoomiyuhu wuxuu si degdeg ah u amrayaa in laga qaado, hadday suurto-gal u noqotana wuxuu u dhiibayaa ciidanka nabadgelyada si dacwad loogu oogo, dhacdadaasna qoraal ayaa lagu diiwaan-gelinayaa.*~~

***[Fiiro Gaar ah:*** *Qodobkani sidan ayuu u qorna ka hor wax ka bedelkii 2009ki, oo loogu dhaqmi karaa doorashada golayaasha deegaanka ee 2012 oo keliya:*

1. *Markuu dhamaado hawlgalka ku xusan qodobka kore, Gudoomiyaha goobta cod-bixinta wuxuu cod-bixiyaha siinayaa warqaddii cod-bixinta oo lagu dhuftay shaambaddii goobta oo laga reebay dabadii hadhaaga ahayd ee laga gooyey.*
2. *Markaa cod-bixiyuhu wuxuu gelaya qolka yar ee uu warqadda ku soo calaamadinayo, kuna soo xidhanayo.*
3. *Cod-bixiyuhu wuxuu calaamad soo saarayaa warqaddii cod-bixinta oo ka soo saarayaaa dhinaca midig ee astaanta uu codka siinayo, asagoo isticmaalaya qalin-Biro ah oo uu siinayo xoghayaha goobtu. Ka dib warqaddii wuu soo laabayaa.isagoo ku xidhaya dacalkii yaraa ee xabagta lahaa waxanu ku ridayaa sanduuqii loogu talagalay cod-bixinta.*
4. *Markuu cod-bixiyuhu warqaddiisa ku rido meesha daloosha sanduuqa, waa inuu goobta ka baxo, waxase ka horaysa inuu Gudoomiyaha goobtu hubiyo in cod-bixiyaha ay si fiican uga*

*muuqato calaamaddii aan tirtirmayn, markaas haddii aanay calaamaddu si fiican u muuqan waa in lagu celiyo mar kale, si loo cadeeyo inuu codkiisii dhiibtey.*

5. *Haddii cod-bixiyuhu arko in warqadda la siiyey aanay dhamayn ama dhaawac qabto, waa inuu soo celiyo oo Gudoomiyaha goobta weydiisto mid fayow, arrintaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.*
6. *Gudoomiyaha goobtu wuxuu xaq u leeyahay inuu goobta ka saaro cod-bixiye kasta oo cudur-daar la'aan goobta ku daaha oo laga qaado warqadda cod-bixinta, waxana mar kale loo ogolaan karaa inuu codkiisa dhiibto markay dadkii kale ee goobta ku sugnaa ee codkooda dhiibanayey ay dhamaadaan.*
7. *Haddii cod-bixiye lagu helo inuu sito waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah ama kuwo ka duwan kuwa codka lagu bixinayo ama hore codkiisa u soo dhiibtey, Gudoomiyaha goobtu waa inuu si de deg ah u amro in la qabto oo booliska u dhiibo si maxkamad loo horgeeyo, Arintaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.]*

**Qodobka 48aad**
**Hawlgalka cod-bixinta**

1. Hawlgalka cod-bixintu waa in la dhamaystiro hal maalin gudaheed oo ka bilaabmaysa 7:00 saac ee subaxnimo kuna dhamaanaysa 6:00 fiidnimo
2. . Cod-bixintu way soconaysaa wakhtiga xidhitaanka la tixgelin mayo, haddii ay jiraan cod-bixiyayaal safka ku jira oo aan welli codkooda bixin ilaa ay ka dhamaanayaan.

**Qodobka 49aad**
**Go'aanka cabashooyinka ee goobta cod-bixinta**

Xafiiska goobta cod-bixintu waa inuu si ku meel gaadh ah go'aan uga gaadho cabashooyinka (haddii ay jiraan) oo ay ka mid yihiin kuwa af ahaan loo soo jeediyey iyo wixii muran ah ee ku hawlgalka goobta cod-bixinta. Cabashooyinka iyo muranadaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.

**Qodobka 50aad**
**Hawsha ka horaysa Tirinta Codadka**

1. Markay cod-bixiyayaashu codkooda bixiyaan Gudoomiyaha goobtu wuxuu cod sare ku dhawaaqayaa inay cod-bixintu xidhan tahay.
2. Markuu Gudoomiyaha goobtu ka ururiyo miiska dhamaan waraaqaha iyo qalabka aan tirinta wax ahmiyad ah u lahayn wuxuu bilaabayaa hawsha soo socota:-
   b. Hubinayaa tirada cod-bixiyayaasha isagoo ka eegaya tirada waraaqaha cod-bixinta.
   t. Ururinayaa oo tirinayaa waraaqaha cod-bixinta ee aan la isticmaalin waxaanu ku ridayaa baqshadda 1aad.
   j. Xaqiijinayaa oo saxeexiisa ku muujinayaa waraaqaha doorashada ee xumaaday ama aan hagaagsanayn ee ay soo celiyeen cod-bixyayaashu, ama la arkay inay xun yihiin, waxaanu ku ridayaa baqshada 2aad.

## Qodobka 51aad
## Tirinta codadka

1. Marka Gudoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha ku xusan qodobka la soo dhaafay wuxuu bilaabayaa tirinta waraaqaha cod-bixinta ee sanduuqa ku jira. Si taa loo fuliyo Hubiyuhu wuxuu markiiba sanduuqa ka soo saarayaa hal warqad cod-bixineed, wuxuuna u dhiibayaa Gudoomiyaha, Gudoomiyuhuna wuxuu furayaa warqaddii codbixinta oo cod sare ku dhawaaqayaa ururka/xisbiga codka lagu siiyey; warqadaas waxa hubiyuhu u sii gudbinayaa Hubiyaha kale oo isna tusi doona wakiilada Xisbiyada/Ururada, markaas xoghayaha ayaa gelinaya foomka khaanadaysan ee loogu talagalay ururka/xisbiga codkaas helay waxaanu warqadaas ku ridayaa sanduuqa loo sameeyay
2. Ma banana in sanduuqa laga soo saaro warqad kale oo cod-bixineed inta tii ka horaysay laga dhamaynayo ee sanduuqa lagu ridayo. Hawsha waxa maamulaya hawl-wadeenada goobta oo keliya.
3. Gudoomiyaha goobtu markuu dhameeyo tirinta, wuxuu hubinayaa tirada waraaqaha cod-bixinta, iyo inay is keenayaan tirada codadka ururada/axsaabtu guud ahaan heleen, wuxuu intaas raacinayaa tirada codadka lagu muransan yahay ama aan hagaagsanayn ama aanay waxba ka
jirin ee ku xusan qodobka 57aad ee xeerkan.
4. ~~*Guddoomiyaha goobtu, markuu caddeeyo ee uu sidaas saxeexiisa ku muujiyo:*~~
   ~~*b. wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee wax-kama-jiraanka laga dhigay iyo waraaqaha cabashada ee wakiillada xisbiyada ku ridayaa baqshadda 3aad.*~~
   ~~*t. wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee lagu muransan yahayna ku ridayaa baqshadda 4aad.*~~
   ~~*j. ugu dambayntiina, wuxuu waraaqaha ansaxay ee la tiriyey ku uruurinayaa baqshadda 5aad*~~
5. ~~*Hadii sanduuqa cod-bixinta laga helo waraaqo dheeraad ka ah ama ka duwan kuwii goobta lagaga codeeyey, sida iyaga oo aan lahayn shaambaddii goobta, lambarkii waraaqaha cod-bixinta ee goobta amaba nooc ahaan aanay ula mid ahayn waraaqaha lagaga codeeyey goobta, hawlwadeennada goobta cod-bixineed waxay ka dhex saarayaan waraaqaha la tirinayo, waxayna tusayaan wakiilada xisbiyadda ee goobta codbixinta, ka dibna waa la daadinayaa, iyadoo dhacdadaas la diiwaangelinayo.*~~

*[**Fiiro Gaar ah:** Faqradahan 4aad iyo 5aad sidan ayey ahaayeen ka hor wax ka bedelkii 2009kii, oo loogu dhaqmi karaa doorashada golayaasha deegaanka ee 2012 oo keliya:*

*4. Gudoomiyaha goobtu markuu caddeeyo ee sidaas saxeexiisa ku muujiyo wuxuu waraqadaha aan saxda ahayn ama waxba kama jiraanka laga soo qaadey ama muranku ka taagan yahay iyo waraaqaha cabashada iyo dacwooyinka ku ridayaa baqshadda 3aad.*

*5. Gudoomiyaha goobtu wuxuu ugu dambeyntii waraaqihii cod-bixinta ee la tiriyey ku ururinayaa baqshadda 4aad.]*

## Qodobka 52aad
## Xidhitaanka Hawsha Tirinta

1. Markuu Gudoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha tirinta ee ku xusan qodobada kore wuxuu iyadoo fagaare ah ku dhawaaqayaa wadarta tirada cod-bixiyayaasha, codadka saxda noqday iyo tirada codadka uu helay liis kasta oo xisbi/urur.
2. Intaa dabadeed, Baqshadaha waa la lingaxayaa, korkana waxa lagaga dhufanayaa shaambaddii goobta, waxaana korka wadajir uga saxeexaya Gudoomiyaha goobta, ugu yaraan hal hubiye iyo wakiilada xisbi/urur kasta oo murashaxiin ku leh goobta-codbixinta
3. Baqshadaha korkooda waxa lagu qorayaa faahfaahinta waxa baqshadda gudaheeda ku jira
4. Hawsha tirinta waa in loo dhamaystiro si isdaba jooga ah ee la soo tilmaamay oo hakad lahayn oo wax kale aan la dhex galin
5. Qoraalada raadraaca ahi (records) waa inay si cad u muujiyo hawlaha kor ku xusan

**<u>Qodobka 53aad</u>**
**<u>Codadka xumaada ama Lagu muransanyahay</u>**

1. Waraaqaha cod-bixinta marka la tirinayo waxay noqonayaan waxba kama jiraan:
   a) Haddii ay ka duwan yihiin waraaqaha cod-bixinta ee Komishanku gartay in doorashada loo isticmaalo.
   b) Haddii aanay lahayn shaambadda goobta cod-bixinta
2. Waraaqaha cod-bixinta ee la tiriyay waxay noqonayaan waxba kama jiraan haddii:-
   b) Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqdaan qoraal ama calaamado ama raad si xirfadl leh loo soo agaasimay oo aan loogu talagelin in lagu qoro.
   t) Haddii warqadda cod-bixinta aanay si fiican uga muuqan Karin Ururka/xisbiga codka la siiyey oo la aqoonsan kari waayo.
   j) Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqato in cod-bixiyuhu calaamadeyay hal astaan xisbi/urur wax ka badan
3. Codka waxba kama jiraan wuxuu noqon karaa marka go'aan wadajir ah isku raacaan Hawl-wadeenada goobta cod-bixintu. Haddiise ay isku raaci waayaan oo ay ku kala qaybsamaan, waxa waraaqahaas cod-bixineed loo aqoonsanayaa kuwo muran ka taagan yahay.
4. Xafiiska Doorashada ee degmada ayaa go'aan ka gaadhi kara waraaqaha cod-bixinta ee muranku ka taagan yahay.

**<u>Qodobka 54aad</u>**
**<u>Qoraalka raadraaca Goobta Cod-bixinta</u>**

~~1. *Natiijada raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariyey komishanka doorashooyinka Qaranku ee ka kooban xaashi asal (original) ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo (copies) ah, iyadoo fagaare ahna waxa Guddoomiyaha Goobtu ku dhawaaqayaa:*~~
   ~~*b. tirada guud ee ka codaysay goobtaa,*~~
   ~~*t tirada codadka xumaaday,*~~
   ~~*j tirada codadka lagu muransan yahay;*~~
   ~~*x tirada codadka ansaxay, iyo*~~
   ~~*kh tirada ay kala heleen xisbiyada/musharrixiinta tartamay;*~~

~~2. *Xaashida asalka ah ee foomka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa loo gudbinayaa Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada ee Gobolka, laba nuqulna waxa lagu ridayaa isla sanduuqa ay ku jiraan baqshadaha lingaxan ee ku xusan qodobka 55aad (1 iyo 2) ee xeerka iyo wixii ka hadhay agabkii doorashada waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Doorashada ee Degmada, saddexda nuqul ee soo hadhayna waxa la kala siinayaa wakiillada saddexda xisbi.*~~

*[**Fiiro Gaar ah:** Qodobkani sidan ayuu u qorna ka hor wax ka bedelkii 2009kii, oo loogu dhaqmi karaa doorashada golayaasha deegaanka ee 2012 oo keliya:*

1. *Qoraalka raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foom loogu talagalay oo saddex nuqul ah, kaas oo Komishanku u soo diyaariyey.*
2. *Laba nuqul oo qoraalka raadraaca ka mid ah waa in lagu rido saxaradda oo la raaciyo baqshadaha lingaxan ee ku xusan qodobka 55aad oo loo gudbiyo xafiiska doorashada degmada, nuqulka saddexaad waa in loo gudbiyo Gudoomiyaha xafiiska doorashada ee gobolka, iyadoo la raacinayo wixii ka hadhay agabkii doorashada ee kala duwan.]*

## Qodobka 55aad
## Qaadista iyo wareejinta Qalabka

1. Gudoomiyaha goobta cod-bixinta oo ugu yaraan ay la socdaan xubin hawlwadeenada ka tirsani iyo Boolis ilaalo ahi ayaa qaadaya qoraalka raadraac iyo baqshadaha goobta kuna wareejinaya xafiiska doorashada ee degmada, iyadoo aan lahayn wax dib u dhac ah.
2. Marka xafiiska doorashada ee degmada lagu wareejinayo baqshadaha waa in la hubiyo inay lingaxan yihiin oo aan la furin lana farafarayn. Gudoomiyaha doorashada ee degmadu waa inuu bixiyo caddaynta la wareegidda agabkaas.

## Qodobka 56aad
## Shaqada xafiiska doorashada ee Degmada

1. Markuu Gudoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu helo agabka lagu tilmaamay qodobka 55aad ee xeerkan waa inuu:-
   b. Waa inuu faro hubiyayasha, xoghayaha iyo tiriyayaasha inay hawshooda u diyaar garoobaan.
   t. Waa inuu u yeedho wakiilada ururad/axsaabta ee murashaxiin ku leh degmada ee Komishanku soo ogolaaday inay goob-joog ahaadaan inta hawshu socoto.
   j. Markay Gudoomiyaha, hawlwadeenada iyo Wakiiladu hubiyaan inay saxaraduhu lingaxan yihiin oo aan la furin, waa inuu furo saxarada oo ka soo saaro qalabka ku jira oo hubiyaa.
   x. Markay wadajir u hubiyaan in baqshadahu lingaxan yihiin oo aan hore loo furin, waa inuu furaa baqshadda ay ku jirto shaamnbadu oo hubiyaa in lambarka shaambadu ku yaal qoraalada.
2. Xafiiska doorashada ee degmadu waa inuu markaas hubiyo in qoraalada iyo baqshadaha ku xusan qodobada 50,51,54aad ee xeerkan ay dhan yihiin.

## Qodobka 57aad
## Tirinta cod-bixinta Doorashada Madaxtooyada.

*Xafiiska Doorashada ee Degmadu, markuu la wareego qalabka goobta doorashada, iyadoo ay goob-joog yihiin wakiillada xisbiyada ee Xafiiska Doorashada ee Degmadu:*

1. *Wuxuu hubinayaa inay baqshadaha kala duwani si hagaagsan u lingaxan yihiin;*
2. *Wuxuu hubinayaa codadka wax-kama-jiraanka laga dhigay, wixii isbeddel ah ee halkaa ka soo baxana wuxuu ugu kala darayaa xisbiyada/musharrixiinta tartamay;*
3. *Wuxuu go'aan ka gaadhayaa waraaqaha cod-bixineed ee lagu muransan yahay, iyadoo waraaqaha uu garto in la tiriyo uu xisbiyadu/musharrixiintu siday u kala heleen ugu kala darayo;*
4. *Wuxuu go'aan ka gaadhayaa sanduuqyada goobaha cod-bixineed ee lagu muransan yahay, natiijooyinka goobahaa cod-bixineedna wuxuu ku qorayaa foomamka raadraaca natiijooyinka cod-bixineed ee goobahaas;*
5. *Sanduuq cod-bixineed wuxuu noqon karaa:*
   *B. mid la tiriyo, haddii loo aqoonsado in si sharciga waafaqsan loogu codeeyey;*
   *T. wax-kama-jiraan, haddii ay sugnaato in si aan sharciga waafaqsanayn loogu codeeyey;*
   *J. waxa waajib ah in sanduuqa lagu murmo xaaladda sugnaanshihiisa lagu go'aamiyo sugnaanshihiisa labada xaaladood ee ku xusan xubnaha "a" iyo "b" ee faqraddan midkood.*
6. *Go'aanka Xafiiska Doorashada ee Degmadu wuxuu ku ansaxyaa aqlabiyadda fudud ee hawlwadeennada xafiiska.*
7. *Haddii uu Xafiiska Doorasho ee Degmadu muranka sanduuqa goobta cod-bixineed ama cabasho ku saabsan waraaqo lagu muransanaa dhammayn kari waayo amaba ay cabasho ka timaaddo dib-u-hubinta waraaqo xafiis doorasho ee goob cod-bixineed wax-kama-jiraan ka dhigay, wuxuu u gudbinayaa sanduuqa iyo warbixintiisa oo qoraal ah ama cabashada Xafiiska Doorashada ee Gobolka oo ku dedaali doona inuu muranka halkaa ku dhammeeyo.*
8. *wuxuu isu geynayaa natiijada doorashada ee dhammaan goobaha cod-bixinta ee degmada, waxaanu natiijada raadraaca doorashada ee degmada ku qorayaa foomka loogu tala-galay oo ka kooban xaashi asal ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo ah, iyadoo fagaare ahna wuxuu ku dhawaaqayaa:*
   *b tirada guud ee ka codaysay degmada,*
   *t tirada codadka xumaaday,*
   *j tirade codadka lagu muransan yahay*
   *x tirada codadka ansaxay, iyo*
   *kh tirada ay kala heleen xisbiyada/musharrixiinta tartamay;*
9. *wuxuu u dirayaa Xafiiska Doorashada ee Gobolka xaashida asalka ah ee raadraaca natiijada doorashada Degmada oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee goobaha degmada iyo nuqulladdii natiijooyinka dhammaan goobaha degmadu, laba nuqulna wuxuu ku ridayaa sanduuqa, saddexda nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada saddexda xisbi ee Xafiiska Doorashada Degmada.*

***[Fiiro Gaar ah:** Wax ka bedelka Qodobkan oo lagu sameeyey 2009kii iyo 2010kii waxa u ku saabsan yahay doorashada Madaxweynaha, oo wax saameyn ah kuma laha doorashada golyaasha deegaanka ee 2012, haddanna waxba lagama bedellin.]*

## Qodobka 58aad

## Hawsha xafiiska doorashada ee Gobolka

1. Xafiiska doorashada ee gobolku markuu helo qoraalada raadraaca goobaha cod-bixinta iyo natiijada guud ee codadka ka soo baxay degmooyinka gobolka iyo inta xisbi kasta ka helay ee uu u soo gudbiyey xafiisyada doorashada ee degmooyinka gobolku wuxuu hubinayaa xisaab ahaan natiijada codadka.
2. *Xafiiska Doorashada ee Gobolku wuxuu ka go'aan-gaadhayaa wixii cabasho ka taagnayd ama lagu muransanaa ee loo soo gudbiyey, iyadoo ay goob-joog yihiin wakiillada xisbiyada tartamayaana, wuxuu isu geynayaa natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolka, waxaanu soo saarayaa:*
   *b. tirada guud ee codadka laga dhiibtay dhammaan degmooyinka Gobolka,*
   *t. tirade guud ee codadka xumaaday ee degmooyinka Gobolka.*
   *j. tirada guud ee codadka ansaxay ee degmooyinka Gobolka,*
   *x. tirada codadka ay kala heleen xisbiyada tartmay;*
   *ka dib markuu natiijada doorashada ee gobolka geliyo foomka loogu talagalay, wuxu iyadoo fagaare ah, ku dhawaaqayaa natiijada Doorashada ee Gobolka.*
3. *Xafiiska Doorashada ee Gobolku:*
   *B) wuxuu natiijada raadraaca doorashada ee gobolka ku qorayaa foomka ku xusan faqradda 2 ee qodobkan oo ka kooban xaashi asal ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo ah;*
   *t) xaashida asalka ah, oo uu ku lifaaqan yahay nuqul ka mid ah natiijada doorashada ee degmo kasta oo gobolka ah, wuxuu u dirayaa Maxkamadda Sare;*
   *J) laba nuqul, oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolkuna, wuxuu u dirayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka;*
   *X) saddexda nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada saddexda xisbi ee Xafiiska Doorashada Gobolka.*

***[Fiiro Gaar ah:** Wax ka bedelka Qodobkan ee faqradaha 2aad iyo 3aad oo lagu sameeyey 2009kii shuqul kuma laha diiwaangelinta codbixiyaasha, waana kuwii hore oo xagga nidaamka la yaro hagaajiey, loomana baahna in dib loogu noqdo oo kuwan:*

3. *Gudoomiyaha xafiiska doorashooyinka ee gobolku wuxuu hawlgalka ka samaynayaa raad raac lagu qorayo foomka loogu talgalay oo saddex nuqul ka kooban, wuxuuna laba nuqul oo ka mid ah u gudbinayaa xafiiska dhexe ee doorashooyinka (Komishanka) kan asliga ahna (original) Maxkamadda sare ee dalka.*
4. *Xafiiska doorashda ee gobolku markuu helo natiijada cod-bixinta doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa, Wuxuu natiijada u gudbinayaa Komishanka si uu u hubiyo uguna dhawaaqo natiijada si ku meel gaadh ah.]*

## Qodobka 59aad
## Tirinta codadka doorashada Degaanka & ku dhawaaqidda natiijada

Gudoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu markuu helo agabka ku xusan qodobka 55aad ee doorashada degaanka, markaas waa inuu

1. Waa inuu tiriyo oo isu geeyo dhamaan cod-bixinta ka soo baxday goobaha cod-bixinta degmada
2. Hubiyo codadka waxba kama jiraanka ah ee ka soo xerooday goobaha cod-bixinta degmada

3. Go'aan ka gaadho codadka lagu muransan yahay.
4. Tiriyo codadka ansaxay ee urur/xisbi kasta ka helay doorashada degmada.
5. Xisaab ahaan isu qaybiyo tirada guud ee codadka ansaxay ee degmada iyo tirada kuraasta degaanka degmada, soona saaro inta urur/xisbi waliba ka helayo codadka.
6. Hubiyo urur/xisbi kasta inta uu ka helayo kuraasida degaanka.
7. Markaas ku dhawaaqo magacyada murashaxiinta ee xisbi/urur kasta ku guulaystay doorashada, iyagoo isugu xiga siday u kala horeeyeen, sida uu tilmaamayo qodobka 23aad ee xeerkan
8. Natiijada doorashada degmada si fagaare ah ugu dhawaaqo kuna dhejiyo boodhka xafiiska doorashada ee degmada magacyada murashaxiinta guulaystay.

## Qodobka 60aad
## Gudbin raad raac (records)

1. Raadraacyada hawlgalada ku xusan qodobada 55aad, 56aad iyo 58aad ee xeerkan waxa lagu qorayaa foomamka Komishanku u diyaariyey mid kasta, waana inay ahaadaan min saddex nuqul.
2. Nuqulada raadraacyada (records) waxaa loo qaybinayaa sida uu tilmaamayo qodobada 55, 58aad ee xeerkan.

## Qodobka 61aad
## Soo saaridda Go'aanada Doorashooyinka Degaanada

Xafiiska doorashada ee degmaddu waa inuu soo saaro go'aanka doorashada degmada, iyagoo ku muujinaya qoraal kooban oo ay ku qoran yihiin magacyada murashaxiinta ku guulaystay doorashada degaanka, waxaana lagu dhejinayaa xafiiska maamulka Dawladda Hoose ee ay khusayso. Iyagoo nuqul ka mid ahna u gudbinaya xafiiska dhexe.

## Qodobka 62aad
## Hubaal-celinta doorashada Degaanada

1. Gudoomiyaha Maxkamadda gobolku waa inuu hubaal-celiyo oo ansixiyo go'aanka doorashada
   Golayaasha degaanada. Waa inuu go'aan ka gaadho wixii muran ama cabasho ah ee guud ahaan uu u soo gudbiyey xafiiska doorashada ee degmadu ee soo baxay intii hawshu socotey.
2. Wixii tabasho ama dacwad ah ee aan loo keenin xafiisyada doorashada waxaa loo gudbin karaa maxkamadda gobolka toban cisho gudahood oo ka bilaabanta maalinta lagu dhawaaqo natiijada doorashada.

## Qodobka 63aad
## Hawsha xafiiska Dhexe ee Doorashada

1. Gudoomiyaha Komishanku markuu helo qalabka & qoraalada raadraaca ee ku xusan qodobka 60aad ee xeerkan, waa inuu a. Inuu faro kaaliyayaasha iyo xoghaynta inay u diyaaargaroobaan hawsha.
   b. U yeedho Wakiilada ururada/axsaabta si ay goob-joog u ahaadaan marka hawshu socoto.
   t. Inay wadajir u hubiyaan in baqshaduhu lingaxan yihiin oo aan la furin, markaa waa inuu furaa oo ka soo saaraa agabka ku jira.
   d. Inay wadajir u hubiyaan in baqshadahu lingaxan yihiin oo aan la furin, markaa waa inuu furo baqshadda ay ku jirto shaambadda xafiiska doorashadu, waana in qoraalka raadraaca lagu muujiyo lambarka shaambada.
   j. Waa inuu qalabka hadhay u gudbiyo xoghayaha
2. Xafiiska dhexe ee doorashooyinku waa inuu markaas hubiyo inuu helay qoraalka raadraaca ee ku xusan qodobka 60aad ee xeerkan oo laga doonayo xafiisyada doorashooyinka ee degmooyinka/gobolada.

## Qodobka 64aad
## Ku dhawaaqidda natiijada Doorashooyinka Madaxtooyada

1. Gudoomiyaha Komishanku markuu ka helo xafiisyada doorashooyinka ee degmooyinka/gobolada waa inuu:
   b. Go'aan ka gaadho dacwooyinka la xidhiidha cod-bixinta iyo tirinta.
   t. Tiriyo oo isku geeyo (xisaab ahaan) codadka ansaxay, kuwa xumaaday ama waxaba kama jiraanka ah ee ka yimid xafiisyada doorashooyinka gobolada.
   j. Markuu si walba u hubiyo ee uu ku qanco in hawshu si habsami u dhacday, wuxuu si ku meel gaadh ah ugu dhawaaqayaa natiijooyinka doorashada Madaxweynaha iyo ku Xigeenka Madaxweynaha.

## Qodobka 65aad
## Dacwadaha doorashada

1. Dacwadaha ku saabsan doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waxa awood u leh maxkamadda sare, waana in dacwadaasi *ay* soo gaadho kaalinta maxkamadda ~~20~~ *10* maalmood gudahood oo ka bilaabmaya ~~marka~~ *maalinta ay Komishanka Doorashooyinka Qaranku ku dhawaaqaan* ~~lagu dhawaaqo~~ natiijada *ku-mel-gaadhka ah* ~~doorashada~~. *Maxkamadda Sare, waa in ay ka hor intaanay muddada Dastuuriga ahi dhammaanin ay go'aan kaga gaadho dacwaddaas.* Haddii ay wakhtigaa *loo cayimay* dhaafto dacwadaasi wax tixgelin ah ma ~~yeelanayso~~ *leh*.
2. Maxakamadda Sare markay hesho qoraaladda raadraaca ee xafiisyada gobolada ee doorashada iyo kuwa xafiiska dhexe ee Komishanka isla markaana hubiso xisaab ahaan iyo sharci ahaan doorashada waxay ku dhawaaqaysaa natiijada doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa.

## Qodob 66
## Adeegsiga iyo dhaqangalka wax-ka-bedelka iyo kaabidda Xeerka Doorashooyinka No. 20/2001

1. *Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista xeerka Doorashooyinka Lr. 20/2001, waxa loo adeegsan karaa oo keliya doorasho kasta oo ku salaysan nidaamka doorasho ee cod-bixiyayaashu diiwaan-gashan yihiin ee laga qabto dalka JSL.*[10]
2. *Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista xeerka Doorashooyinka ee Lr. 20/2001 wuxuu dhaqan-gelayaa marka ay Golayaasha sharci dejintu ansixiyaan uuna saxeexo Madaxweynaha JSL, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee dawladda.*

| | |
|---|---|
| **C/raxmaan Maxamed C/laahi (Ciro)** | **Maxamed xasan Kaahin (Keyse)** |
| **<u>Guddoomiyaha Golaha Wakiillada</u>** | **<u>Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada</u>** |

[10] Qodobkan oo lagu daray Xeerka 2009kii waxa uu soo baxy waqti aan la hubin in diiwaangelinta codbixiyaashu ay hirgelidoontu iyo in kale, waxaanu cadeeynaa in wax ka bedelkaas ku saabsanaa diiwaangelinta uun lagu dhaqmidoono doorashhoyinka lagu galayo diiwaanka.